



Helitaanka Natijjooyinka: Hagaha Waxbarashada Gaarka ah ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle

Waxbarashada Gaarka ah ee Seattle PTSA: U doodista Dugsiyada Loo Dhan Yahay

Himiladayada:



Waxaan caawinaa qoysaska ardayda naafada ah markay u socdaan nidaamka waxbarashada.



Waxaan dhisnaa buundooyinka u dhheeeyya bulshada waxbarashada guud iyo kuwa gaarka ah si aan u keeno ilo waxbarasho oo kordhay iyo fursadaha dhammaan ardaydha.



Waxaan iskaashi la sameynaa waalidiinta iyo barayaasha marka aan u doodno horumarinta nidaamka waxbarashada gaarka ah.

Waxbarashada waalidka:



Fursadaha lagu maqlo oo laga barto khabiirada iyo u doodayaasha iyada oo loo marayo webinars; Wacyigelinta iyada oo loo marayo wargeesyada, warbaahinta bulshada, iyo meelaha kale ee ku saabsan siyaasadihii ugu dambeeyay ee saameeya ardaydeena si aan bulshada ula socodsiiro hababka ugu fiican iyo xuquuqda waalidka; shirarka billaha ah ee martida khudbadaha.

Sip & Sheeko:



Kulan aan rasmi ahayn oo aan salaamo qoysasku si ay isula xiriiraan oo ay isu taageeraan inta aan ku guda jirno naafada xagga waxbarashada.

Waxa aanu samayno:

U doodista:

Waxaan samaynay guddijo ka shaqeeya sidii ay ardaydeenna ugu abuuri lahaayeen natijjooyin wanaagsan iyo inay taageeraan daryeelayaashooda.

Guddiyada:

- Qoyska iyo ka qaybgalka bulshada
- U doodista Sharci-dejinta
- Dhaqannada ka mid noqoshada
- Xakamaynta iyo Go'doominta
- Miisaaniyad/Maaliyad
- Sinnaanta Qowmiyada iyo ka mid noqoshada
- Dysleksi
- Isgaarsiin
- Xubinimo
- Dhaqaale ururin

Xiriir:

hello@seattlespecialeducationpts.org
Waxbarashada Gaarka ah ee PTSA **PTA**
<http://seattlespecialeducationpts.org>

- <https://www.facebook.com/SeattleSpecialEducationPTSA/>
- <https://www.linkedin.com/company/seattle-special-ed-pts/>
- <https://twitter.com/SeattleSEPTSA>

10ka Talo ee ugu Sareeya:

Liis ah talooyinka waxtarka leh ee lagu maareynayo Adeegyada
Waxbarashada Gaarka ah

1

Dukumeenti: Codso Ogeysiis Qoraal Hore ah (PWN) mar kasta oo isbeddel la soo jeediyay la sameeyo oo ku saabsan IEPga ardaygaaga.

2

Lasoco: Had iyo jeer la soco wada hadal kasta, mid rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn, iimayl si aad u diiwaangeliso dooda iyo go'aan kasta oo la gaaro.

3

Keen saaxiib: Keen qoraal-qaade shirarkaaga IEP si aad diiradda u saarto dooda. Wuxaad sidoo kale codsan kartaa inaad keento bixiyeyaal gaar ah.

4

Dib u eeg xogta: Marka ay kooxi soo jeedinayo go'aan, waydiiso inaad aragto oo dib u eegto xogta kooxda ka hor inta aanad gabagabada samayn.

5

Ogow xuquuqdaada: Akhri oo had iyo jeer tixraac Habraaca Ilaalinta ee qeexaya xuquuqda waalidka iyo ardayga:



6

Is abaabul: Abuur nidaam aad ku xarayso oo aad habayso dhammaan diiwaanada IEP/504 ee ardaygaaga oo kula soo qaado kulammada. Ku dar tusaalooyinka shaqada.

7

Yaa ka masuul ah?: Marka tallaabo gaar ah loo baahdo, hubi inaad waydiiso cidda hawshaas fulinaysa iyo goorta.

8

Gaaryeeli ardaygaaga: Samee kulan gaaban oo aan rasmi ahayn oo aad la yeelato macalimiinta ardaygaaga bilawga sanadka oo sii nuqlka hordhaca ardaygaaga oo ay la socoto IEP/504. Tani waxay hubinaysaa inay ka warqabaan waxa looga baahan yahay qorshaha oo ay diyaar u yihiin inay taageeraan ardaygaaga.

9

U fiirso: Indho-indhaynta gudaha dugsiga waxa codsan kara waalidka ama daryeelaha marka lagu daro bixiyeyaasha gaarka ah. Codsiga waa in lagu sameeyaa qoraal iyo ka hor. Shaqaalah degmada ayaa joogi doona inta lagu jiro kormeerka.


10

Laxiriir: Ka dhig khadadka wada-xiriirku mid furan oo wada-shaqeyn dhexmarta adiga iyo kooxda dugsiga. Qaar baa u arka inay waxtar leedahay inay abuuraan qorshe isgaarsiin oo lagu daro IEP/504. Xiriirka (dokumentiyada iyo shirarka) waa in lagu bixiyaa luqadaada.

- Waxaan aqoonsannahay in habka loo dejiyay ay aad ugu adkaan karto qoysaska inay maraan, marka fadlan la xiriir ururada ku taxan bogga 18 ee hagaha haddii aad u baahan tahay taageero ama kaalmo.

Shaxda Ururka Shaqaalaha:

Yaa qayb ka ah kooxda ilmahayga, maxayse yihiin doorarkoodu? Buuxi shaxanka adiga oo kaashanaya shaqaalaha dugsiga si aad u fududaato tixraac.



Helitaanka Luuqadda iyo Hoyga Daryeelaha

Dugsiyadu waa inay u ogolaadaan kaqeybgalka dhameystiran waalidka iyo ardaydga

① **Maxaan samayn karaa haddii agabka IEP-da aan la igu siin luqaddayda hooyo?**

Sharcigu wuxuu dhigayaa in degmadu ay ku bixiso agabka afkaaga hooyo. Samee codsi qoraal ah oo ku saabsan agabyada luqaddaada hooyo maamulaha kiiska ka hor kulanka IEP. Ku dar maamulaha cogsigan. Haddii dukumeentigu aan lagugu sheegin afkaaga, waajib kuguma aha inaad ka qaybgasho kulanka waxaadna codsan kartaa in dib loo dhigo marka dokumentiyada lagugu keeno afkaaga hooyo.

Ku qor welwelkaaga qoraal oo la xiriir kormeeraha gobolka si aad u hesho taageero.

② **Maxaan samayn karaa haddii agabka IEP-da aan si fiican loo turjumin oo aanan wax macno ah samaynaynin?**

Sharcigu wuxuu farayaa in waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah si buuxda loogu ogeysiyo afkooda hooyo wax kasta iyo dhammaan macluumaaadka la xidhiidha bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ardaygooda oo u baahan ogolaanshahooda.

③ **Sidee loo tixgaliyaa baahiyaha luqadda ardaygayga inta lagu jiro nidaamka IEP?**

Helitaanka luqaddu waa qayb ka mid ah tixgalinta gaarka ah ee ah qaybta loo baahan yahay ee wadahadalka inta lagu jiro horumarinta IEP.

④ **Maxaan samayn karaa haddii aan u baahdo turjumaan si aan si buuxda uga qaybqaato kulanka IEP?**

Sharcigu wuxuu farayaa in degmadu ay kugu siiso lacag la'aan fasiraa qoraalka ah ama turjubaano afka ah. Ku qor Codsigaaga tarjumaad qoraalka iyo turjumaanka afka qoraal ahaan ka hor kulanka IEP.

⑤ **Ardaygayga ma laga rabaa in lagu imtixaamo oo lagu qiimeeyo Ingiriis?**

Maya, dhammaan imtixaanada iyo qiimaynaha waa in lagu qaadaa luuqada hooyo ee ardayga oo ay ku jirto ASL.

⑥ **Yaan kala xiriiraa taageerada luqadda?**

Kala xiriir maamulaha dugsigaaga iyo maareeyaha kiiskaaga. Tarjumaadda ASL, kala xiriir iskuduuhaha 504 ee 504coordinator@seattleschools.org.

⑦ **Maxaan samayn karaa haddii aan u baahdo hoy daryeele ahaan?**

Ciwaanka II ee ADA "waxa uu mamnuucayaa takoorida ku salaysan naafanimada dhammaan adeegyada, barnaamijiyada, iyo hawlaha ay siyaan dadweynaha ee dawladda iyo dawlada hoose." U hubso inaad hore ugu sii ogeysiiso shaqaaluhu wax kasta oo la dejyo oo kaa caawin doona inaad si buuxda uga qaybgasho daryeel bixiye ahaan. Tusaalooyinka is-waafajinta qaarkood waa:shirarka aragtida humaaga fog laga qabto, tarjumaadda ASL, dukumeenti lagu bixiyay qaab elektaroonig ah oo qoraal lagu raadin karo, qoraal xiran, wakhti dheer oo dib loogu eego dukumeentiyada, wakhti dheer oo dib loogu eegayo lagana jawaabo go'aamada, agabka aragga si loo taageero wadahadalka, si degdeg ah loo galo si aad ula kulanto qoraal, dukumeenti ku qoran luqad cad iyo kulamo la duubay.

Talooyin u doodid

Waa wax ka fiican in la hadlo



Su'aalo weydiinta macalimiinta iyo maamulka looma arko mid aan habooneyn. Ha ka baqin inaad u sheegto welwelka ku saabsan waxbarashada ardaygaaga macalimiinta iyo maamulka dugsiga. La xiriir hay'adaha dibadda ee kaa caawin kara inaad muujiso welwelkaaga. Qaar badan oo ka mid ah ururadan waxay ku bixiyaan taageero iyo adeegyo luqado kala duwan. La dhis xiriir waalidiin kale si ay kaaga caawiyaan socodsinta nidaamka.

- Xusuusnow inaad xaq u leedahay inaad codsato adeegyada turjumaada qoraalka ah iyo turjumaada afka ah dugsiyada haddii loo baahdo. Xitaa haddii aad ku hadasho luqadda, waxaad codsan kartaa turjumaan afka ah si uu kaaga caawiyo inaad u sharaxdo awoodaha iyo caqabadaha ilmahaaga iyo sidoo kale fahamka waxa ay la xiriiraan kooxda dugsiga iyo waxa ka soo baxa go'aamadaas.
- Way fiican tahay in la yiraahdo "Ma fahmin," "Ma ku celin kartaa taas?" "Ma isiin kartaa tusaale?" "Sidee baad ardayda uga baraysaa dhaqankayga iyo naafanimada?" Waa muhiim inaad fahanto waxa laga hadlayo iyo waxa ka dhacaya fasalka ilmahaaga iyo dugsiga. Weydiiso tarjumaan afka ah xitaa haddii aad ku hadasho Ingiriisiga si uu kaaga caawiyo bixinta caddaynta, si aad u fahamto waxa la sheegayo oo la go'aamiyo, iyo inuu kaa caawiyo inaad la wadaagto waxyaabaha ku saabsan ardaygaaga iyo sida naafadiisu u saamayso waxbarashadooda.
- Wadaagista dhaqankaaga, qiyamkaaga, iyo caadooyinkaaga fasalka iyo dugsiga ilmahaaga waxay caawin kartaa kordhintu ifshamka iyo ixtiraamka midba midka kale.
- Kulamada IEP waxay noqon karaan kuwo aad u culus oo jahawareer leh. Keenista saaxiib ama u doode (hay'adaha qaarkood ayaa bixiya taageeradan) waxay kaa caawin kartaa hubinta in adiga iyo ilmahaagu aad helaysaan taageerada aad u baahan tiihin.
- Dhisidda iskaashiga u dhexeeya macalimiinta iyo waalidiinta waxay faa'iido u yeelan kartaa horumarka iyo guusha ardaygaaga. Waaad codsan kartaa inaad la kulanto macalimiinta ardaygaaga wakhti kasta, qaar badana waxay kula xidhiidhi doonaan iimaylka ama qoraal haddii aad weydiiso. Bilawga sanadka, kala hadal macalinka ardaygaaga sidii aad u samayn lahayd qorshe xariir ah oo aad waydiiso inaad hagaajiso qorshaha sanadka oo dhan sida loogu baahdo.

Khariidadda Waddada:

Ardaygaagu caqabado ayuu kala kulmayaa dugsiga laakiin ma laha IEP ama qorshe 504.

- 1 Wax ka baro faraqiga u dhixeyya IEP iyo 504, eeg bogga 9.
- 2 Diiwaangeli caqabad kasta oo ardaygaagu kala kulmo dugsiga.
- 3 La xiriir macalinka iyo maamulaha wixii aad tabanayso iyo codsiyadaada. Ku qor qoraal ahaan, luqadda aad doorbidayso.
- 4 Qabso kulan aad la yeelato macalinka ilmahaaga si aad ugala hadasho welwelkaaga iyo fursadaha aad heli karto si aad u taageerto ardeygaaga. Codso turjumaan ka hor kulanka.
- 5 Qor wixii go'aanno ah iyo wadahadalada shirka oo ugu dir iimayl macalinka iyo maamulaha.
- 6 Codsi qoraal ah u samee maamulaha si uu u bilaabo u gudbinta adeegyada waxbarashada gaarka ah.
<https://www.parentcenterhub.org/evaluation-2/#model>
- 7 Dib u eeg go'aanka degmada ee ku saabsan in ardayga la qiimeeyo iyo in kale. Tani waa in qoraal ahaan lagugu soo bandhigaa waana inay qeexdaa go'aankooda, oo ay ku jirto diidmada qiimeynata.
- 8 Ka qaybgal shirka qiimaynta kooxda IEP si aad dib ugu eegto natiijooyinka qiimaynta oo aad u go'aamiso u-qalmitaanka 504 ama IEP.
- 9 Ka qaybgal shirka IEP ka dib kulanka qiimaynta. Tani waxay si toos ah u dhici kartaa kulanka qiimaynta ka dib ama wakhti dambe. Kooxda IEP ayaa go'aamin doonta xadiga adeegyada barnaamijka iyo meelaynta kulanka IEP.
- 10 Waqtii ku qaado habkan oo weydii su'aalo kasta. Haddii aad u baahan tahay wakhti dhereaad ah, codso kulan IEP kale si aad wax uga qabato welwelkaaga.
- 11 La soco kulanka IEP adiga oo u diraya qoraalladaada kooxda dugsiga oo aad ka codsato PWN oo diiwaangeliya go'aamadii la gaaray intii lagu jiray shirkii IEP.
- 12 Horumarka laga gaarayo yoolalka IEP waa in lala socdo oo loo sheego waalidiinta. Hubi inaad codsato warbixinta horumarka oo dib u eeg horumarka ardaygaaga saddexdii biloodba mar.

Taariikhaha iyo waqtiyada muhiimka ah:

Ogaanshaha marka ay saacadu bilaabato inay tikleyso nidaamka waxbarashada gaarka ah IEP/504 waa lama huraan

Habraaca

Maalmaha Jawaabta

Go'aanso inaad qiimeye: Go'aanso inaad qiimeye:

25
Maalmaha Dugsiga

Qii mee:

35
Maalmaha Dugsiga

Qabo Kulanka IEP Qiimaynta Kadib:

30
Maalmo

Qiimaynta Waxbarashada Madaxbanaan:

15
Maalmo

Dib u eegista IEP:

12
Bilood

Dib-u-qiimaynta:

3
SANNO

Cabashooyinka:

1
SANAD

Habraaca saxda ah:

2
SANNO

Qiimaynta: 25 maalmood oo dugsiyedka si aad uga jawaabto codsiga qiimaynta.

IEP: Marka degmadu ay go'aamiso in ardaygu u qalmo, IEP waa in lagu sameeyaa 30 maalmood gudahood.

Qiimaynta Waxbarashada Madaxbanaan: Haddi IEE uu waalidku ku codsado kharashka dad waynaha, degmadu waxa looga baahan yahay inay kaga soo jawaabto 15 maalmood gudahooda ama ay buuxiso nidaamka cadaaladeed ama ogolaato IEE oo ay bixiso dadwaynaha.

Dib u eegista IEP: Barnaamijyada Waxbarashada Qofka waa in dib loo eego 12 biloodba mar.

Dib-u-qiimaynta: Dib u qiimaynta IEP waa in ay dhacdaa 3 dii sanaba mar, iyo marka waalidka ama degmadu codsado ilaa hal mar sanadkii.

Cabashooyinka: Cabashooyinka Bulshada Waxbarashada Gaarka ah waa in la soo gudbiyaa oo helaa Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI). OSPI waa inay ku bixisaa go'aan 60 maalmood gudahooda.

Habraaca saxda ah: Nidaamka xuquuq dhowerka leh waa in uu soo gudbiyaa oo helaa OSPI. Marka la soo gudbiyo, dugsigu waa inuu la yeeshaa kalfadhi xallinta waalidka/daryeelayaasha 15 maalmood gudahood, ilaa labada dhinacba ay ka tanaasulaan xaqaas. Waxaa jira muddo 30 maalmood ah oo la isku dayo in lagu gaaro heshiis xallin. Haddii uusan jirin heshiis, waaxda waxbarashada ee gobolka waxay haysataa 45 maalmood si loo gaaro go'aanka dhageysiga nidaamka xuquuq dhowerka leh.

Qeexitaanno:

Macno ka samaynta ereyada iyo ereyada soo gaabinta ee
habka waxbarashada gaarka ah IEP/504

Barnaamijka Waxbarashada Shakhsii ahaaneed (IEP):

Dukumeenti qeexaya adeegyada, hoyga, iyo wax ka beddelka uu ilmahaagu sharcii ahaan ku khasban yahay inuu helo.

Deegaanka ugu xaddidan (LRE):

Shuruudaha sharciga ah ee IDEA ka dhextira in ardaydu ay la socdaan waxbarashada asxaabtooda aan naafada ahayn ilaa iyo inta ugu badan ee suurtogalka ah. Waa mabda'a ee maaha meel.

Ogeysiis Qoraal Hore ah (PWN):

Ogeysiis iyo go'aamo kooban oo la gaaray oo ku saabsan barnaamijka waxbarasho ee ardaygaaga oo la siiyay waalidiinta **KAHOR INTAAN LAFULIN**. Waxay u baahan tahay in waalidiinta la siiyo mar kasta oo go'aan iyo isbeddel la gaaro iyo marka wax la soo jeediyo la diido.

Qiimaynta Waxbarashada Madaxbanaan (IEE):

Qiimayn uu sameeyay imtaxaan aqoon leh oo aan u shaqayn dugsiga degmada ilmahaaga. Tan waxaa la codsan karaa haddi waalidka ama masuulka ay ku khilaafaan qiimaynta ay degmadu samaysay.

Sanad Dugsiyeedka La Dheereeyey (ESY):

Kani waa adeeg la bixiyo inta lagu jiro fasaxyada dugsiga (xagaaga, fasaxa jiilaalka, iwm.) kaas oo si gaar ah loogu talagalay in wax looga qabto ardayda u baahan in laga taageero ilaalinta aqoonta ama xirfadaha habdhaqanka. Go'aaminta u-qalmitaanka waxay ku salaysan tahay dokumentiyada dib u celinta iyo dib u soo celinta iyo sidoo kale talooyinka kooxda IEP ee ku saabsan darnaanta naafonimada ardayga, xirfadaha soo baxaya, iyo heerka horumarka.

Qiimaynta Habdhaqanka Shaqada (FBA):

Qalab qiimayneed oo loo isticmaalo in lagu fahmo shaqada hab-dhaqanka ardayga waana saldhigga lagu horumarinayo taageerooyinka faragelinta togan.

Qorshaha Faragelinta Dhaqanka (BIP):

Qorshe la sameeyay ka dib FBA-da kaas oo kor u qaadaya faragelinta dhaqanka suuban iyo xeeladaha lagu dhimayo dhaqanka la beegsanayo iyo in la baro dabeecadaha beddelka ah.

Waxbarashada Dadweynaha ee Bilaashka ah iyo Ku Haboon (FAPE):

FAPE waxay leedahay laba macne, kuwaas oo labaduba khuseeya ardayga IEP. Qaybta 504 waxay qabtaa in ardayda naafada ahi ay helaan fursado waxbarasho oo la mid ah kuwa dhigooda ah ee aan naafada ahayn. Marka loo eego IDEA, FAPE waxay u baahan tahay barnaamij waxbarasho oo shakhsii ah kaas oo loogu talagalay in lagu daboolo baahiyaha gaarka ah ee ubadka oo ilmuuhu ka helo faa'iiddada waxbarashada.

Habraaca saxda ah:

Qaab rasmi ah oo lagu xalliyoo khilaafaadka dugsiga ee ku saabsan waxbarashada ilmahaaga. Wuxaan xereyn kartaa nidaamka xuquuq dhowrka leh oo keliya khilaafaadka waxbarashada gaarka ah. Wuxaan xaq u leedahay sarkaal dhegaysi oo aan eex lahayn iyo inaad keento caddaymo iyo marqaatiyaal dhegaysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh.

Hordhaca Ardayga

Qaab aan rasmi ahayn oo ardaygaaga loogu baro kooxda dugsiga

Horudhac ardaydu waa qalab waxtar leh oo la isticmaali karo laakiin aan looga baahnayn kooxda dugsiga halkaas oo adiga iyo ardaygaagu aad ku wadaagi kartaan xooggooda iyo yoolalka sanadka soo socda. Tan waxaa loo abuuri karaa qaab kasta sida xaraf, resume-ka, ama boodhadh. Ka qaybgeli ardaygaaga oo ka qayb qaado tallaabadan muhiimka ah.

Mawduucyada aad ku dari karto waa ardayga:

- Awoodaha
- Caqabadaha
- Luuqadaha/Wadahadalka
- Xeeladaha shaqeeya
- Danaha
- Sooyaalka dhaqanka
- Welwelka caafimaadka ama badbaadada
- Hadafyada
- Dhaqanka guriga

Waa kan tusaale hordhac arday:

SAKURA TAKAGI
FOURTH GRADER

GOALS
I am a generous and spunky 9 year old who loves to read and draw. I love to play the drums and when I grow up I want to be an artist.

LANGUAGES
Japanese
English

INTERESTS
• Science
• Animals
• Arts and crafts
• Minecraft
• Reading
• Music

CULTURE AT HOME
I have a younger brother. Both of my parents work full time. My grandparents live with me and my family for much of the year. They help take care of me and are an important part of my daily life.

STRENGTHS

- Reading
- Creativity
- Resilience
- Curiosity
- Enthusiastic

CULTURAL BACKGROUND
I am a second generation Japanese American.

PROVEN STRATEGIES

- Using models
- Access to manipulatives
- Repetition
- Frequent checks
- Social skill small groups with peers

WHAT I AM WORKING ON

- Math
- Communication with peers
- Developing peer relationships
- Self-advocacy

HEALTH AND SAFETY
Gluten and dairy free

Lagu Siiyay bog daabacan si aad ugu buuxiso ardaygaaga. ►




MAGACA


HEERKA

AWOODAHA

HADAFYADA




DANAHA



DHAQANKA GURIGA



LUQADAH



SOOYAALKA DHAQAN^{ka}

XEELADAH LA CADDEEY


WAXA AAN KA SHAQAYNAYO

CAAFIMAAD IYO BADBAADO



Talaabooyinka Kordhinta:

Miyaadan helin taageerada ardaygaagu u baahan yahay?
Waa kuwan tillaabooyinka la qaadayo ardayda horay loogu
aqoonsaday IEP/504



SBL

Jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo

② Waa maxay farqiga u dhexeeya Qorshaha 504 iyo IEP?

Qorshaha 504 iyo IEP labaduba waa qorshe rasmi ah oo ay abuuraan kooxda waxbarashada ubadka si ay u bixiyaan taageerooyin daboolaya baahida ardayga loogana hortagayo takoorka. Laakiin waa dokumentiyo kala duwan oo leh shuruudo iyo ilaalin kala duwan. Qorshaha 504 ma aha nooca fudud ee IEP.

IEP	Qorshaha 504
Barnaamij waxbarasho oo shaqsi ah	Qorshe lagu hubinayo gelitaanka deegaanka waxbarashada
Liis ah waxa uu ilmuu u baahan yahay si uu u "helo" waxbarashadooda ku salaysan qiimaynta tusaale ahaan xogta la wado waxaa ku jira waxbarid si gaar ah loo habeeyay (SDI).	Liiska hoyga, gargaarka, iyo adeegyada bixiya gelitaanka FAPE laakiin aan beddelin yoolalka waxbarashada
Ilaalinta Habraaca IDEA si loo ilaaliyo xuquuqda waalidiinta iyo ardayda iyo qiimaynta	Qaypta 504 Ilaalada Habraaca, aad u xaddidan
Sida IDEA, waxay u baahan tahay in waalidku xubin firfircooni ka ahaado kooxda IEP	Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay ka hor inta aan la fulin qorshaha 504
Sida IDEA, waxay u baahan tahay dib-u-qiimeyn ilmaha 2-3 sano kasta	Isticmaal qiimaynta xogta iyo diiwaanada, qiimayn rasmi ah looma baahna
Kormeerka horumarka ayaa loo baahan yahay iyadoo lagu salaynayo xogta	Looma baahna la socodka horumarka
Lagu dhisay yoolal shaqo iyo waxbarasho	Yool la'aan

② Waa maxay farqiga u dhexeeya waxa loo qoondeeyay iyo meelaynta?

Waxa loo qoondeeyay waa erey gaar ah oo lagu isticmaalo Shakhxiyaadka Naafada ah ee Waxbarashadda (IDEA), sidaa awgeed waxa loola jeedaa wax la mid ah Maraykanka oo dhan, marka la eego xaaladda waxbarashada gaarka ah. Waxa loo qoondeeyay waxaa ka mid ah barnaamijka, xarumaha, shaqaalaha, goobta, ama qalabka loo baahan doono si loo bixiyada waxbarashada gaarka ah. Qoondeeynta waa dhammaan adeegyada ku xidhan ee la siiyo ardayga naafada ah. Meelaynta ardaygu waa goobta ay dugsiga ka dhigtaan. Degmadu waxay go'aamisa meelaynta, ka dib markay tiixeliso meelaynta iyo adeegyada ardayga. Marka ay suurtagal tahay oo ay ku habboon tahay, ardayda helaysa adeegyada waxbarashada gaarka ah waxaa loogu adeegi doonaa dugsiga xaafadooda. Ardeyda qaar baa laga yaabaa in ay wax ka beddeleen hawlahooda shaqo adag awgeed.

② Halkee ayuu ardaygu ka heli doonaa adeegyada?

Ardaydu waxay ku helaan adeegyo deegaankooda ugu xaddidan (LRE) kuwaas oo si gaar ah loogu talagalay arday kasta. Tani waxay noqon kartaa goobta waxbarashada guud ama ka saarista fasalka kale mid-ka-mid ama koox yar.

② Ardaygayga ma looga baahan yahay inuu leeyahay naafso caafimaad laga helay si loogu gudbiyo adeegyada waxbarashada gaarka ah?

Maya, baaritaan caafimaad looma baahna si loo qiimeeyo ardayga.

SBL

Jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo

① Waa maxay dariiqooyinka adeegga aasaasiga ah?

Dugsiyada Dadweynaha Seattle (SPS) waxay qeexeen dhown waddoo oo ah "Adeegyada aasaasiga ah" ee gaarka u ah SPS. Takhasusyadan la qeexay waxay abuuraan wadooyin/xulashooyinka la saadaalin karo ee meelaynta dugsiga ardayga iyo horumarinta xirfadda macalinka. Sharaxaada noocaan ah ee Adeegga Aasaasiga ah waxay khuseeyaan ardayda iska diiwaan gelisay Dugsiyada Dadweynaha Seattle, fasalada K-12, iyo ardayda helaysa adeegyada kala guurka waxbarashada gaarka ah (ilaa 21 jir).

② Jaantusyada Dugsiga Iskuxiran ee 2021-22 (la cusbooneysiyyay 6/1/2021)

Dugsiyada Iskuxiran ee Dugsiyada Hoose

Dugsiyada Iskuxiran ee Dugsiyada Dhexe

Dugsiyada Iskuxiran ee Dugsiyada Sare

③ Sidee loo qeexay Dariiqyada Adeegga Aasaasiga ah ee SPS?

Dariiqaa Adeegga	Sharaxaada
Agabka	Ardaydu waxay helayaan waxbarid si gaar ah loo habeeyay (SDI) oo ka hadlaysa kala duwanaanshaha qafifika ah ilaa dhexdhexaadka ah ee baahidooda waxbarida ee baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah iyo xirfadaha bulshada. Ardeydaani waxay waqtigooda waxbarashada inta badan ku qaataan goobaha leh waxbarashada guud iyagoo wata taageero la beegsanayo. *+
Helitaan	Ardayda leh baahiyoo adeeg oo dheeraad ah. Waxay helyaan waxbarid si gaar ah loo qaabeeyey (SDI) oo wax ka qabanaysa baahidooda tacliimeed ee dhexdhexaadka ah iyo kuwa degdega ah. Ardaydani waxa ay awoodaan in ay horumar ka sameeyaan himilooyinkooda IEP iyaga oo inta badan wakhtigooda waxbarida ku qaadanaya goobaha waxbarashada guud. Ardaydani waxa kale oo laga yaabaa inay ka faa'iidaystaan waxbarasho gaar ah oo kala duwan, oo ay ku jiraan waxbarid koox yar iyo faragelin. *+
Foowjignaanta	Ardayda hela waxbarid si gaar ah loo habeeyay (SDI) si ay wax uga qabtaan baahiyahooda waxbarasho iyo shaqo ee degdega ah. Ardaydu waxay haystaan fursado ay kaga qaybgalaan manhajka waxbarashada guud iyagoo u maraaya waxbarid si gaar ah loo habeeyay. Ardaydani waxay ka faa'iidaystaan inay ku qaataan inta badan wakhtigooda waxbarida koox yar oo ah deegaankooda ugu xaddidan (LRE), laakiin tani way ku kala duwanaan kartaa IEP.*
Bulsho/Dareen	Ardayda hesha waxbarid si gaar ah loo qaabeeyey (SDI) si ay u taageeraan horumarinta xirfadahooda bulsho/dareen, shaqadooda, iyo fahamka. Ardaydu waxay heli karaan qayb ama dhammaan waxbaridda akadeemiyadeed iyadoo loo marayo SDI, sida uu go'aamiyay IEP-ga ardayga. Adeegyada inta badan waxaa lagu bixiyaa goob koox yar, laakiin tani way ku kala duwanaan kartaa IEP.*
Kala duwanaansho	Ardayda ka faa'iidsata manhajka oo si weyn uga duwan manhajka waxbarashada guud. Waxbarashada sida gaarka ah loo qaabeeyey (SDI) waxaa ku jiri kara tacliin, isgaarsiin, nolol iyo qaybo xirfad shaqo. Adeegyada inta badan waxaa lagu bixiyaa goob koox yar, laakiin tani way ku kala duwanaan kartaa IEP.*

* Adeegyada waxaa lagu bixin karaa goob kasta, iyadoo lagu salaynayo IEP-ga ardayga.

* Noocan adeegga aasaasiga ah waxaa heli kara ardayda u qalma qayb kasta oo naafada IDEA ah.

SBL

Jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo

Dariiqa Adeegga	Sharaxaada
Dhegola'/Ku adag maqalka (DHH)	Ardayda ku hesha waxbarid si gaar ah loo qaabeeyey (SDI) deegaankooda ugu xaddidan (LRE), sida ay go'aamiyeen kooxdooda IEP. Nuxurka wax-barashadu waxay ardayda siisaa fursado ay kaga qaybgalaan manhajka waxbarashada guud iyada oo loo marayo waxbarid si gaar ah loo habeeyey oo leh hoy, beddelaad iyo adeegyo turjumaan . Ardeydu waxa laga yaabaa inay ka faa'iidaystaan isku-darka adeegyada taageerada ama tas-hiilaadka gaarka ah ee ka baxsan aagga shaqada. Adeegani wuxuu u furan yahay ardayda dhagoolaha ama maqalka adag.
Himilada	Ardeydu waxay helaan waxbarid si gaar ah loo habeeyay (SDI) deegaankooda ugu xaddidan (LRE) sida ay go'aamiyeen kooxdooda IEP. Nuxurka wax-barashadu waxay ardayda siisaa fursado ay kaga qaybgalaan manhajka waxbarashada guud iyada oo loo marayo hab-waxbarasho si gaar ah loo habeeyey oo leh dejin iyo wax-ka-beddello sida Hanuuninta iyo Dhaqdhaqaaqa (O iyo M) iyo adeegyada aragga, oo ay ku jiraan wax-barida Braille . Ardeydu waxa laga yaabaa inay ka faa'iidaystaan isku-darka adeegyada taageerada ama tas-hiilaadka gaarka ah ee ka baxsan aagga shaqada. Adeegani wuxuu u furan yahay ardayda indhoolayaasha ama aragga naafada ah.
Caafimaad ahaan Jilicsan	Ardeydu waxay helaan waxbarid si gaar ah loo habeeyay (SDI) deegaankooda ugu xaddidan (LRE) sida ay go'aamiyeen kooxdooda IEP. Nuxurka wax-barashadu waxay ardayda siisaa fursado ay kaga qaybgalaan manhajka waxbarashada guud iyada oo loo marayo waxbarid si gaar ah loo habeeyey. Ardeydu waxa laga yaabaa inay ka faa'iidaystaan isku-darka adeegyada taageerada ama tas-hiilaadka gaarka ah ee ka baxsan aagga shaqada. Adeegyada inta badan waxaa lagu bixiyaa goob koox yar, laakiin tani way ku kala duwanaan kartaa IEP. Adeegani wuxuu u furan yahay ardayda leh baahiyoo daryeel caafimaad oo degdeg ah dhammaan qaybaha naafada ee IDEA.
18-21 Adeegyada Kala-guurka	Ardayda ku jirta adeegyada kala guurka waxay helayaan waxbarid si gaar ah loo habeeyay (SDI) ee ardayda, da'doodu tahay 18-21 sano, oo leh baahiyoo waxbarasho oo gaar ah oo shaqaynaysa . Adeegani wuxuu u furan yahay ardayda da'doodu u dhaxayso 18-21 jir, kuwaas oo u qalma qayb kasta oo naafada IDEA ah.

Laga soo xigtay <https://www.seattleschools.org/departments/special-education/services/placement-and-primary-service-types/> 4/5/22

+ Adeegyada waxaa lagu bixin karaa goob kasta, iyadoo lagu salaynayo IEP-ga ardayga.

* Noocan adeegga aasaasiga ah waxaa heli kara ardayda u qalma qayb kasta oo naafada IDEA ah.

② Ardaygaygu ma muujinayo horumar ka dib marka uu fuliyo IEP. Maxaan samayn karaa hadda?

La xiriir maamulaha kiiska ardaygaaga si aad ula wadaagto welwelkaaga oo aad u codsato kulanka IEP. Kulanka, ka hadal welwelkaaga oo soo jeedi in wax laga beddello IEP haddii loo baahdo.

③ Ardayga ma loo ogol yahay hal kulan IEP sanadkii?

Maya. Waalidku waxa uu codsan karaa kulanka IEP wakhti kasta. Codsigaaga ku qor qoraal iyo sababaha sababta kulanka IEP uu lagama maarmaan u yahay. Degmadu waxay go'aaminaysaa haddii ay ku heshiyaan in ardaygu ka faa'iidsan doono wadahadalka kooxda IEP oo ama hore u sii maraan soo jeedinta wakhtiga iyo taariikhda kulanka ama waxay ku taliyaan beddelka wax ka qabashada welwelka. Haddii degmadu diido inay qabato shirka IEP, waa inay diidmadooda gelisaa PWN.

④ Sideen ugu diyaar garoobi karaa kulanka IEP?

Dib u eeg IEP hore iyo warbixinaha horumarka. Horay u diyaari su'aalahaaga iyo welwelkaaga.

SBL

Jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo

① **Maxaa dhacaya haddii degmadu ay sheegto in ardaygaygu aanu u qalmin IEP?**

Waa inay keentaa sababta oo qoraal ah. Tani waxay badanaa ku jiri doontaa PWN. Haddii aadan ku raacsanayn natijada qiimaynta, hubi inaad qorto inaad ka soo qaybgashay shirka oo aadan ku raacsanayn natijada qiimaynta.

② **Miyay xadidan tahay inta hadaf ee ku jiri karta IEP?**

Maya, hadafyadu waxay ku salaysan yihii baahida ardayga, ee maaha agabka dugsiga.

③ **Waa maxay wax ka beddelka IEP?**

Wax ka beddelka IEP waa isbeddel yar ama wax ka beddel lagu sameeyo IEP. Kulan buuxa oo kooxda IEP ah oo talo bixin ah looma baahna si ay wax uga beddelaan haddii dhammaan dhinacyada ay ku heshiiyaan. Waxaa lagu talinayaan in wax ka beddelka la soo jeediyay lagu daro PWN ka hor inta aan wax isbeddel ah la samayn.

④ **Maxaan samayn karaa haddii aan agabka IEP la ii siin ka hor shirka, ama aan la siin wakhti hore oo ku filan si aan u helo wakhti aan dib ugu eego kulanka ka hor?**

Waaliidinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah waxay xaq u leeyihiin inay baadhaan oo ay dib u eegaan diiwaanada sannad dugsiyeedka oo dhan, gaar ahaan ka hor kulanka IEP. Haddii aad codsatay inaad dib u eegto diiwaanka oo aan la siin, la xidhiidh maamulaha dugsiga iyo kormeeraha gobolka. Wuxuu codsan kartaa in shirka dib loo dhigo ka dib markaad waqtii u heshid inaad dib u eegto diiwaanada iyo dukumentiyada.

⑤ **Maxaa dhacaya haddii aanan ku raacsanayn natijooinka qiimaynta?**

Ku qor welwelkaaga qoraal. Wuxuu codsan kartaa IEE ama Qiimaynta Waxbarashada Madaxbanaan. Degmadu waxay mas'uul ka tahay bixinta macluumaadka kaa caawin doona helitaanka IEE.

⑥ **Yaa bixiya kharashka Qiimaynta Waxbarashada Madax-banaan (IEE)?**

Waaliidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waa inuu kafaalo qaadaa kharashaadka IEE; si kastaba ha ahaatee, wuxuu codsan kartaa IEE kharashka dadwaynaha, laakiin taasi waxay u baahan tahay dhageysi nidaam cadaalad ah ilaa degmadu ogolaato codsigaaga.

⑦ **Yaa sameeya qorshaha 504?**

Koox shaqsiyaad ah oo garanaya oo fahmaya baahiyaha ubadka oo tarjumi kara xogta iyo macluumaadka qiimaynta. Guud ahaan, waaliidka ama masuulka, macalinka waxbarashada guud, 504 xidhiidhiye(yaasha), iyo maamulka dugsiga ayaa ka qaybqaata horumarinta qorshaha 504.

⑧ **Maxaa ku jira qorshaha 504?**

Qorshaha 504 ayaa inta badan ka mid ah hoyga iyo taageerada ilmaha iyo sidoo kale cidda bixinaysa oo la socon doonta taageerooyinkan.

⑨ **Haddii ardaygaygu leeyahay qorshe 504, ma loo arkaa arday helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah?**

Maya. Ardayga qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah wuxuu leeyahay IEP, ma aha 504 qorshe. Laakiin waxaan wali ku darnaa iyaga marka aan dhahno "ardayda waxbarashada gaarka ah."

SBL

Jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo

① Sideen u codsadaa adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyey (ESY) ardaygaya?

Codsigaaga qoraal ku dhig bilawga sanadka. Haddii kulanka IEP ee ardaygaaga la qorsheeyay horraanta sanadka, weydii inaad kala hadasho ESY kulanka IEP. Haddii kale, codso kulanka IEP si aad uga wada hadashaan ESY.

② Ka warran haddii aynaan ka hadlin dhammaan welwelkayaga wakhtiga loo qoondeeyey kulanka IEP?

Wadahadallada waa la soo bandhigi karaa oo la qorsheyn karaa waqtii dambe haddii aysan jirin waqtii ku filan inta shirka lagu jiro. Hubi in sii socoshada kulanka IEP la qorsheeyay ka hor inta uusan dhamaan kulanka hadda socda.

③ Sideen ula xidhiidhi karaa kuwa kale ee jooga dugsiga ardaygaya ee wadaaga khibradaha la midka ah?

La xidhiidh Guddida Waxbarashadda Gaarka ah ee Seattle PTSA Qoyska iyo Ka Qaybgelinta Bulshada oo waydii taageero ku xidhidhaynta qoysaska kale. Wuxuu qoysaka karaa oo aad la xidhiidhi kartaa PTA deegaankaaga ama maamulaha dugsiga.

④ Maxaan sameeyaa haddii degmadu ogolaato inay bixiso qiimayn?

Waa inaad hubisaa in dhakhtarka cilminafsiyeedka dugsigu uu ka warqabo welwelkaaga dhammaan meelaha aad aaminsan tahay in ilmahaagu dhibaato ku qabo. Hubi inaad codsato koobiga qiimaynta dhawr maalmood ka hor kulanka si aad fursad ugu hesho inaad dib u eegto. Si taxaddar leh u akhri oggolaanshaha qiimaynta oo weydii su'aalo haddii aadan fahmin. Saxiifoomka oggolaanshaha oo ku soo celi dugsiga.

⑤ Yaa ka qayb gala kulanka IEP?

Waalidiinta/daryeelayaasha iyo ardaygaaga haddii ay habboon tahay oo ay weheliyaan kooxda dugsiga ee ka kooban maamulaha kiiska, macalimiinta waxbarashada gaarka ah, macalimiinta waxbarashada guud, bixiyayaasha adeegga la xidhiidha (OT, PT, SLP), maamulka dugsiga, maamulaha degmada (sida loo baahdo), shaqaalahaa kala guurka, iyo qof kasta oo aad u aragto inuu khabiir u yahay ilmahaaga oo inta badan ah daaweyayaasha gaarka ah. Wuxuu qoysaka karaa oo aad la xidhiidhi kartaa qoraal-qaade kulanka. Waxaa lagugula talinayaa inaad keento qoraal-qaade kuu gaar ah marka ay suurtagal tahay. Waalidku wuxuu keeni karaa qof kasta oo uu rabo shirka IEP. Dhab ahaan keen saaxiib ama xubin qoyskaaga haddii ay suurtogal tahay.

⑥ Waa maxay faraqa u dhexeeya kooxda SIT iyo kooxda IEP?

SIT ama Kooxda Faragelinta Ardayga waxay ku lug leeyihii qiimaynta waxayna horumariyaan taageerada lagu daray qorshaha 504. Kooxda IEP ayaa maamusha oo horumarisa Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah ee ardayda helaysa adeegyada waxbarashada gaarka ah.

⑦ Goorma ayaa dib-u-qiimaynta la sameeyaa?

Ugu yaraan, 3 dii sanoba mar. Qiimaynta waxa codsan kara xubin ka tirsan kooxda IEP wakhti kasta laakiin degmadu kuma qasbana inay mid dhamaystirto ilaa ay jirto baahi muuqata oo ay ku heshiiveen xubnaha kooxda IEP.

⑧ Maxaa dhacaya haddii dugsiga ardaygaygu aanu lahayn "barnaamijka" waxbarashada gaarka ah ee uu ardaygu u baahan yahay?

SPS waxay u baahan tahay inay ardaydu dhigtaan dugsi bixiya barnaamijka ardayga lagu qoray iyada oo aan loo eegin inuu yahay dugsiga xaafadooda iyo in kale. Waalidiintu waxay xaq u leeyihii inay diidaan oo ay codsadaan in lagu meeleyyo dugsigooda. Haddii degmadu diido codsigan, waalidku waxa uu raaci karaa habraaca cadaaladeed si uu garsooraha ugu ogolaado in uu go'aan gaadho.

SBL

Jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiyo

① **Waxaan leeyahay kaaliye gaar ah oo weyn. Ma iman karaan inay ardaygeyga ku caawiyaan dugsiga?**

Tani waxay ku xiran tahay go'aanka dugsiga. Codsigaaga qoraal ahaan ku weydii jawaabtooda ogaysiis qoran Hore (PWN). Degmadu waxa looga baahan yahay inay bixiso waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon (FAPE) markaa ikhtiyaar kale ayaa noqon doona in la codsado degmada inay bixiso taageerada haddii ay ka hortagayso gelitaanka FAPE.

② **Goorma ayaa dugsiga loo oggol yahay inuu xakameeyo ama la karantiilo ilmahayga?**

Siyaasadda #3246, "Isticmaalka go'doominta waa mamnuuc xaalad kasta. Isticmaalka xannibaadaha ee ardayda waa mamnuuc marka laga reebo xaaladaha marka ay jirto suurtagalnimada dhaawac halis ah oo jidhka ah oo soo food saartay qof. Xaaladahan oo kale, xakamaynta waxaa loo isticmaali karaa oo kaliya sida ugu dambeeyaa iyo kaliya ilaa xadka lagama maarmaanka ah si looga hortago ama loo yareeyo waxyeelada jidheed ee soo socota ardayga ama kuwa kale. Isticmaalka xakameynta ama faragelinta qalalaasaha jireed waa in isla markaaba la joojiyaa mar haddii aysan jirin suurtagalnimada dhaawac halis ah oo jireed oo dhow. Xaaladna ma jirto farsamooyinkan looma isticmaali doono qaab edbin, ciqaab, ku habboonaanta dadka waaweyn, ama sidii looga jawaabi lahaa burburinta hantida ama carqaladaynta ardayga taas oo aan khatar u ahayn dhaawac jidheed."

<https://www.seattleschools.org/wp-content/uploads/2021/07/3246.pdf>

③ **Waa maxay borotokoolka ka jawaabida degdega ah (ERP)?**

Kani waa qorshe jawaab celin ah oo horay loo sii diyaariiyay "xaalado degdeg ah oo keenaya suurtagalnimada dhaawac halis ah oo jireed oo dhow." Waalid ahaan ama daryeel bixiye ahaan, waxa aad dooran kartaa inaad lahaato qorshe ERP adiga oo saxaya sanduuqa ku yaala faylka IEP kaas oo tilmaamaya ogolaanshahaaga ama waxa aad dooran kartaa inaad ka tagto sanduuqa iyada oo aan la calaamadin. "Bartakoollada jawaabta degdega ah, haddii la horumariyo, waa in lagu daraa IEP-ga ardayga oo dib loo eego sannad kasta. Hab-maamuuska jawaabta degdega ah looma isticmaali karo beddelka isticmaalka joogtada ah ee qorshaha faragelinta habdhaqanka kaas oo loogu talagalay in lagu beddelo, beddelo, wax ka beddelo, ama meesha laga saaro dabeecad la beegsaday. Hab-maamuuska Jawaabta Degdega ah waxay diiwaangeliyaan qorshaynta waxbarasho ee horumarsan ee looga baahan yahay in lagu bixiyo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah, habboon (FAPE) iyo oggolaanshaha waalidka ka hor qaadashada Hab-maamuuska Jawaabta Degdega ah." <https://www.seattleschools.org/wp-content/uploads/2021/09/3246SP.pdf>

④ **Sidee buu u eg yahay ka qaybgalka waalidka ee macnaha leh?**

Waa inay ku jirtaa ogaysiis horudhac ah oo ku saabsan shirarka, gelitaanka diiwaannada waxbarashada, ixtiraamka waalidka la-shaqeeyayaasha iyo la-hawlgalayaasha waxbarashada ilmahooda, u-helidda ilmahooda goobta dugsiga, iyo oggolaanshaha waalidka.

⑤ **Ardaygaygu ma ka qaybgeli karaa kulankooda IEP?**

Haa! Waxaa lagu dhiirigelinaya inay ka qaybqaataan sida ugu habboon. Ku bilow goor hore adiga oo kala hadlaya hadafkooda, taageeradooda, iyo waxa ay ku fiican yihiin. Oo ku dhiirigeli shaqaalaha inay raadiyaan fikradda ardaygaaga si joogto ah.

Haddii aadan jawaab u arag su'aashaada, fadlan iimayl u dir:

hello@seattlespecialeducationpts.org

Anshaxa Dugsiga

Noocyada anshaxa ee ay isticmaalaan Dugsiyada Dadweynaha Seattle

Waa maxay?

Goobta dugsiga, "edbinta" ayaa lagu meel mariyey si looga jawaabo xadgudubyada akhlaaqda. Hadafka edbintu waa inuu ahaado wax barida halkii la ciqaabi lahaa.

Isku dheelitir la'aanta anshaxa: Waxaa muhiim ah in la ogaado ardayda Afrikaan Ameerikaanka ah iyo ardayda naafada ah waxaa lagu edbiyya heerar aad uga sarreeya marka loo eego dhiggooda caddaanka ah, neerfaха. Anshaxu waa dhaqan, in kasta oo lagu dhaqo arday gaar ah, ugu dambeyntii u baahan in wax looga qabto heer nidaamsan.

Tallaabooyinka edbinta ugu fiican waa ka hortag, firfircooni, iyo udub dhexaad u ah ka-qaybgalka ardayda xallinta dhibaatooyinka u horseeda xadgudubyada akhlaaqda. Natijjooyinka ardaygu waxa ay dhacaan marka ardaydu dareemaan badbaado oo la arko, marka ay ku hawlan yihiiin ka qaybqaatayaal firfircooni waxbarashadooda, cilaqaad taageero ah dhexdooda, iyo fahamka in "Carruurtu si fiican ayay u shaqeeyaan haddii ay awoodaan" (Ross Greene)¹.

Anshaxa SPS

SPS waxay raacdaa **Akhlaaqda Matrix**² si ay ugu hagto maamulayaasha doorashada jawaabaha edbinta ku habboon ee xadgudubyada akhlaaqda. Sida lagu qeexay dukumeentiga **Xuquuqaha iyo Waajibaadka**³ Ardayga ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle, "ardayda, waalidiinta, iyo dadka ardayda masuulka ka ah waxay xaq u leeyihii inay noqdaan shuraako firfircooni si ay wax u siiyaan ka hor inta aanu dugsigu ku hawlgeelin nidaamka go'aan qaadashada anshaxa."

Falalka anshax-marinta waxaa ka mid ah:



- Ilaalinta Anshaxa Dheeraadka ah ee Ardayda IEP/504 (iyo kuwa aan wali loo aqoonsan inay u baahan yihii 504): waxaa ku jira qiimaynta habdhaqanka shaqaynaysa (**FBA**s)⁴, qorshooyinka faragelinta dabeeecadda (**BIPs**)⁵, dib u eegista go'aaminta muujinta (**MDRs**)⁶ loogu talagalay ardayda geysta xadgudubyada akhlaaqda ee ku lug leh hub, daroogo sharci darro ah iyo/ama dhaawac jidheed oo halis ah). Dugsiyadu waxay haystaan qalab badan oo ay adeegsadaan kuwaas oo wax ka qabta dhibaatooyinka kor u kaca xadgudubyada akhlaaqda kuwaas oo ka caawin kara inay ka fogaadaan ciqaabta ama anshaxa ka saarista.

- Dhaqan-ka-warqabka-ogaalka
- ah⁷ Cadaaladda soo celinta


- Moodooyinka xalinta dhibaatada⁸
- Liiska Habdhaqanka ee OSPI¹⁰

*Walaaca ku saabsan FBA-yada iyo BIP-yada: iyadoo loogu talagalay inay u noqdaan ilaalin ardayga, FBA-yada iyo BIP-yada inta badan kuma xisaabtamaan xaaladaha hoose sida culeyska dareenka ama dhaawaca, taasoo u horseedda dabeeecad ka dhalata tallaabo edbin ah.

Anshaxa Dugsiga

Noocyada anshaxa ee ay isticmaalaan Dugsiyada Dadweynaha Seattle

- Adeegyada Waxbarashada Inta lagu jiro Eryidda*: ardayda waa in la siyyaa adeegyo waxbarasho inta lagu jiro dhammaan cayrinta iyo cayrinta iyada oo aan loo eegin dhererka tallaabada edbinta. Adeegyadani waa inay u oggolaadaan ardayga inuu galo manhajka waxbarashada guud iyo sidoo kale taageeridda ardayga si uu horumar ugu gaaro yoolalka IEP-ga.



Ilaha:

Halkan waxaa ah liis agab waxtar leh.

Wakaaladaha Dowladda:

OSPI/Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha:

<https://www.k12.wa.us/student-success/special-education>

OEO/Xafiiska Dhexdhexaadinta Waxbarashada:

<https://www.oeo.wa.gov/en>

Ururada Bulshada:

Decodingka Dyslexia Washington:

<https://www.facebook.com/decodingdyslexia.wa/>

Xuquuqda Naafada Washington:

<https://www.disabilityrightswa.org/>

Bulshada Down Syndrome ee Puget Sound:

<https://dscpugetsound.org/>

Dyslexia Assoc ee Aduunika - Laanta WA:

<https://www.wabida.org/>

Maalgelinta Suurtagalmimada Ardayga:

<https://studentpotential.org/>

Albaabada U Fur Xarunta Qoysaska Dhaqamada Badan:

<https://www.multiculturalfamilies.org/>

Ku Salaysan Xuquuqda:

<https://rootedinrights.org/>

Asalka ka mid noqoshada:

<https://www.rootsofinclusion.org/>

Isbahaysiga Anshaxa Degmada South King:

<https://www.skcdisciplinecoalition.com/>

Isbahaysiga Waxbarashada Koonfur-bari Seattle:

<http://www.sesecwa.org/>

Arc ee Degmada King:

<https://arcofkingcounty.org/>

Isbahaysiga Autism-ka iyo U doodista:

<https://washingtonautismalliance.org/>

Gacmaha iyo Codadka:

<https://wahandsandvoices.org/>

Isku xirka Adeegyada dhaqamada kala duwan ee Washington:

<https://www.wmslink.org/>

Naafada, Fursadaha, Shaqada Internetka, iyo Farsamada (DO-IT):

<https://www.washington.edu/doit>

Mashruuca Cadaaladda Waqooyi Galbeed:

<https://nwjustice.org/get-legal-help>

Ilmaha Kooxda:

<https://teamchild.org/>

Jinsiga iyo Naafada:

Kooxda Taageerada Afrikaanka Ameerikaanka, Arc ee Degmada King:

<https://arcofkingcounty.org/community-calendar.html/event/2022/01/31/1643666400/african-american-support-group/361823>

Otiisamka Madow:

<https://www.autisminblack.org/about>

Qoysaska Midabka Seattle:

<https://www.focseattle.org/>

Kienan Ellis Mashruuca Waxbarashada (KEEP):

<https://www.keep-wa.org/>

Isgoyska Jinsiga iyo Naafada:

Wadahadalada lala yeelanayo waalidiinta dalka oo dhan: <https://adayinourshoes.com/the-intersection-of-race-and-disabilities-conversations-with-parents-across-the-nation/>

Bixiyeyasha Caafimaadka Dhaqanka:

Adeegga La-talinta iyo Gudbinta Aasiya:

<https://acrs.org/>

Xarunta Waddada Atlantic:

<https://atlanticstreetcenter.org/>

La-talinta Consejo iyo Gudbinta:

<https://consejocounseling.org/>

Caafimaadka Qabiilka Cowlitz Seattle:

<https://www.cowlitz.org/services/health-and-human-services/health-human-services-seattle.html>

Xarunta jinsiga ee Ingersoll:

<https://ingersollgendercenter.org/>

Xirfadlayaasha Caafimaadka Muslimiinta Seattle:

<http://www.mhpseattle.org/>

NAMI (Isbahaysiga Qaranka ee Xanuunka Maskaxda) Seattle:

<https://namiseattle.org/>

Navos:

<https://www.navos.org/>

Ryther:

<https://www.ryther.org/>

Adiga Gabar Kortay!:

<https://www.yougrowgirl.org/>

Xiriirinta Soogaabiyay Waxbarashada Gaarka ah:

<https://www.parentcenterhub.org/acronyms/>

Taariikhda Naafada iyo Wacyigelinta

Mawduuca muujiya wax ku biirinta iyo sheekooinka bulshada iinta



Qolka wax-akhriska

<https://seattlespecialeducationptsas.org/resources-for-families>

- IS YOUR SCHOOL INCLUSIVE?
- LGBTQ+ PEOPLE WITH DISABILITIES
- SESAME STREET AND AUTISM
- CRIP CAMP CURRICULUM
- 'DISABLED': JUST #SAYTHEWORD
- LYDIA X. Z. BROWN, ACTIVIST + ATTORNEY
- HIGHLIGHTING LATINOS WITH DISABILITIES
- INVISIBLE DISABILITIES
- ONE OUT OF FIVE DISABILITY HISTORY CURRICULUM
- HOW THE ONE OUT OF FIVE CURRICULUM CAME TO BE
- THE OVERLOOKED HISTORY OF BLACK DISABLED PEOPLE

Qolka wax-akhriska/Dhallinyarada iyo Dadka waaweyn

<https://seattlespecialeducationptsas.org/resources-for-families>

Ilaha

Bogxirrada ilaha laga tixraacay samaynta dukumeentigan



<https://www.k12.wa.us/student-success/special-education>

<https://www.oeo.wa.gov/en>

<https://adayinourshoes.com/>

<https://www.seattleschools.org/>

<https://apps.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=392-172a>

<https://www.parentcenterhub.org/>

<https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/specialed/pubdocs/ProceduralSafeguards.pdf>

<https://www.ada.gov/>

<https://www.seattleschools.org/about/school-board/policies/4200sp-a-visitors-to-schools/>

Ilaha Anshaxaa

¹<https://livesinthebalance.org/educators-schools/>

²<https://www.seattleschools.org/wp-content/uploads/2021/09/ADA-Discipline-Matrix-21-22.pdf>

³<https://www.seattleschools.org/wp-content/uploads/2021/11/SSR-21-22-november-2021.pdf>

⁴<https://www.understood.org/articles/en/functional-assessment-what-it-is-and-how-it-works>

⁵<https://www.understood.org/articles/en/behavior-intervention-plans-what-you-need-to-know>

⁶<https://www.wrightslaw.com/info/discipl.mdr.strategy.htm>

⁷<https://traumasensitiveschools.org>

⁸<https://www.nwjusticeforum.com>

⁹<https://livesinthebalance.org/our-solution/>

¹⁰<https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/2020%20Behavior%20Menu%20with%20ADA.pdf>



Qalabka lagu soo bandhigay hagahan waxa loogu talagalay ujeeddooyin macluumaad oo keliya. Looguma talagalin talo-yaqaannimo, mana aha in sidaas loo fasirto. Waxbarashada Gaarka ah ee Seattle PTSA kuma hawl gasho bixinta adeegyo sharci ama xirfad kale iyadoo soo dhejinaysa waxyaabaha la sheegay. Adeegyada xirfadlayaasha waa in la raadsadaa haddii loo baahan yahay gargaar sharci ama mid kale oo khaas ah.

Xubinimo

Nagu soo biir oo isbedel samee



Seattle Special Education PTSA

Informing, Educating, Empowering Communities

The Seattle Special Education PTSA advocates for all students with disabilities in the Seattle Public Schools District by:

- Helping families navigate the educational system
- Partnering with parents and educators to advocate for improvements in special education service delivery
- Providing educational resources to our members

We hope you will join our advocacy community!

For your convenience, there are multiple ways to join:

- Online: <https://seattlespecialedptsa.org>
- Mail: Seattle Special Ed PTSA, 7323 17th Ave NW, Seattle, WA 98117
- In person: Hand directly to a board member

We offer all memberships on a sliding scale, starting at no cost, going up by \$5.00 increments. As of July 2021, the total cost that SSEPTSA pays per member is \$12.26:

Seattle Council PTSA dues = \$3.50
Washington State and National PTSA dues = \$8.00
Paypal fee = \$0.76
Total = \$12.26

We encourage each individual to determine what contribution feels right and accessible to you.

Become a member! I'd like to contribute \$ _____

Name(s): _____

School affiliation: _____

Street Address: _____

City: _____ Zip Code: _____

Phone: _____ Email: _____

This email address may be used to offer electronic voting option, initial here to opt-out _____

NOTE: PTA membership is NOT a commitment of your time! Becoming a member shows your support for the PTSA and helps fund advocacy efforts for all students with disabilities. Looking to do more? We always welcome greater involvement. Attend our monthly meetings and/or check one or more boxes below to find out more about our new committees.

- | | |
|---|--|
| <input type="checkbox"/> Fundraising, Budget/Finance | <input type="checkbox"/> Restraint and Isolation |
| <input type="checkbox"/> Racial Equity and Inclusion | <input type="checkbox"/> Inclusionary Practices |
| <input type="checkbox"/> Family and Community Engagement (FACE) | <input type="checkbox"/> Communications/Outreach |
| <input type="checkbox"/> Membership | <input type="checkbox"/> Dyslexia |

For additional info, visit us at <https://seattlespecialedptsa.org>
or follow us on Facebook ("Seattle Special Education PTSA")

<https://seattlespecialedptsa.memberplanet.com/Membership.html>

Bogxirka foomka xubinimadu wuxuu ku hoos jiraa qaybta
Doorashooyinka Lacag-bixinta